Danish Agency for Labour Market and Recruitment

# Marka lagu geeyo warshad shaqo tijaabis

## Soomaali



# Soo dhawoow

Faylkan waxaanu ku soo uruurinay warbixin & macluumaad badan, oo aaanu oogu tala galnay qofka doonaya tababar shaqo(baraaktiig), mishaar kabis waxbarasho, wax barashada intergrationka ama shaqo.

Faylkan waxaad ka akhrisan kartaa 10 qaybood (shirkado/warshado), shaqada ay qabtaan, waxbarashada & tababarada la xiriira shaqadooda.


Qorhso shaqo tababar ah Inaad ka hesho waa waxx aad u wangasan, adna ku fahanto suuqa shaqada Denmark, waxaadna si ican u fahmi qaybaha kala duwan ee shaqada & shaqooyinka ay qabtaan. Sidoo kale waxaa suurta gal kuu noqon karta ina- ad la kulanto shaqaale badan oo kala duwan, oo waxaad heli macaarif & asxaab badan

Meesha aad ka shaqeysid waxaad ka helaysaa saaxiibo, aqoon iyo waayo aragnimo cusub oo keeni kara shaqo joogta ah ama waxaa lagugu dhiiri gelinayaa inaad raadsato siyaabo cusub oo ku saabsan shaqada iyo waxbarashada.

Faylkaan waxaa soo saaray Kompetencecenter Skanderborg fra Skanderborg Kommune.

Danish Agency for Labour Market and Recruitment

# Gaadiidka



## Shaqada aad qabanayso

- Alaab dajin
- Gawaari rarid
- Alaab keened
- Gawaari nadiifin

## Goobaha shaqada

- Xamaliga
- Shirkaddo waawayn oo shaqsi leeye
- Shirkaddaha basaska iyo dekaddaha

## Marka lagu geeyo warshad shaqo tijaabis

- Waxaad baran shaqada qaybta gaadiidka
- Waxaad heli macrifo baddan
- Waxaad la kulmi ood baran madaxda shaqada iyo shaqaalaha goobta
- Waxaad heli khibrad
- Haddi lagu geeyo shaqo tijaabis warshaq, waxaad fursad u lahaan karta in mustaqbalka aad shaqo rasmi hesho

## Sifoonka qofka loo baahan yahay

- Waa inaad jeceshahay khidmaynta iyo dhex galka dadka
- Haddii aad ku hadli karto, akhri karto oo aad fahmi karto daanish ama Ingiriisi yar, waa faa'iido
- Waa inaad awood u leedahay la shaqaynta dadka iyo khidmaynta
- Waa inaad xiiso u hayso shaqada iyo barashada waxyaabo kugu cusub
- Waa inaad tahay qof furfuran, jecel wada shaqaynta
- Waa inaad u hogaansami karto hogaanka shaqada

## Shuruudaha la iska rabo

- Waa inaad tahay qof degan, imaan karana waqtiga shaqada si joogta ah maalin walba
- Waa inaad ilaalin karto balamaha shaqada
- Waa inaad shaqada imaan karto waqti hore aroortii
- Waa inaad u hogaansimi karto qawaaniinta shaqa da, sida shaqaalaha kale
- Waa inaad dalban karto sharaxaad, hadaadan fahmin shaqada laguu diray
- Waa inaad noqotaa qof rabo inuu fahmo shaqada
- Waa inaad leedahay laysanka gaariga, baska, baabuurta waawayn iyo taksiga, haddaad rabto inaad darawal noqoto

## Fursadaha waxbarsho ee aad heli karto; waxaa ka mid ah

- Drawal gaariyada waawayn
- Darawal bas
- Darawal taksi
- Hagista baabuurta wiishashka ah
- Diyaarinta tareenada
- Shaqada dekaddaha iyo meelaha gaaddiidku ku soo xidhaan

# Jikadda iyo baararka



## Shaqada la qabanayo

- La shaqaynta Diyaariyayaasha cuntada
- Kululaynta cuntada
- Diyaarinta ismariska rootiga
- Diyaarinta ansalaatada(saladka)
- Dubida rootiga iyo samaynta keega (doolshaha)
- Soo adeegida cuntada & Bixinteeda
- Buuxinta cuntada buufayga
- Alaab dhaqid
- Nadaafada guud

## Goobaha shaqada

- Xarumaha, meelaha waayeelka, xanaanadaha, iskuulada iyo kuleejooyinka
- Shirkadaha birifeetka ah
- Kamuunayaasha iyo meelaha shaqada dawlada

## Marka lagu geeyo warshad shaqo tijaabis

- Waxaad baran shaqada qaybta jikada iyo baararka shaqaalaha
- Waxaad heli macrifo baddan
- Waxaad la kulmi ood baran madaxda shaqada iyo shaqaalaha goobta
- Waxaad heli khibrad
- Haddi lagu geeyo shaqo tijaabis warshaq, waxaad fursad u lahaan karta in mustaqbalka aad shaqo rasmi hesho

## Sifaadka qofka loo baahan yahay

- Waa inaad ka hesho cunta samaynta
- Haddii aad ku hadli karto, akhri karto oo aad fahmi karto daanish ama Ingiriisi yar, waa faa'iido
- Waa inaad xiisaynayso inaad shaqayso, oo aad barato wax kugu cusub
- Waa inaad ku wanaagsan tahay wada shaqaynta
- Waa inaad u hogaansami karto maamulka shaqada

## Shuruudaha la iska doonayo

- Waa inaad tahay qof degan, oo imaan kara waqtiga shaqada maalin walba
- Waa inaad awoodi karto ka shaqaynta khudrada, kaluunka, digaaagka, hilibka lo'da iyo doofaarka
- Waa inaad u hogaansami karto qawaaniinta shaqada, sida shaqaalaha kale.
- Waa inaad aqbali karto ka shaqaynta hilibka doofaarka meesha shaqada
- Waa inaad dalban karto sharaxaad, hadaadan fahmin shaqada laguu diray
- Waa inaad furfurantahay, oo aad firfircoon tahay
- Waa inaad xoogan tahay oo aad leedahay jir dhismeed fiican
- Waa inaad imaan karto waqti hore shaqada
- Waa inaad shaqada u qaban karto si fiican oo gacan dhakhsan karto

## Fursadaha waxbarsho ee aad heli karto; waxaa ka mid ah

- Kuuk/kariye
- Shaqada baararka
- Nafaqeeye
- Ismaris diyaariye
- Cunto qaybiye
- Kabalyeeri
- Rooti dube
- Macmacaan sameeye

# Farsamada gacanta



## Shaqada la qabanayo

- Dib u dhista guryaha
- Dhisada guryaha iyo warshadaha
- Hagaajinta iyo naashnaashka dhismayaasha
- Iskuulada iyo xarumaha
- Ka shaqaynta garaashyada shaqada, sida warshada biraha
- Hagaajinta qalabka beeraha & tarjiinooyinka
- Rarida alaabta dhismaha
- Dib u hagaajinta baabuurta, matoorada iyo makiinadaha

## Goobaha shaqada

- Goobaha farsamyaqaanada
- Goobaha qandaraaslayaasha
- Shirkadaha dawladda
- Hay'adaha kala duwan
- Shirkadaha guryaha

## Marka lagu geeyo warshad shaqo tijaabis

- Waxaad baran shaqada qaybta farsamada gacanta
- Waxaad heli macrifo badan
- Waxaad la kulmi ood baran madaxda shaqada iyo shaqaalaha goobta
- Waxaad heli khibrad
- Haddi lagu geeyo shaqo tijaabis warshaq, waxaad fursad u lahaan karta in mustaqbalka aad shaqo rasmi hesho

## Sifoonka qofka loo baahan yahay

- Waa inaad jeceshahay ka shaqaynta farsamada gacanta
- Haddii aad ku hadli karto, akhri karto oo aad fahmi karto daanish ama Ingiriisi yar, waa faa'iido
- Waa inaad awood u lahayd shaqaynta dadka iyo khidmaynta
- Waa inaad xiiso u hayso shaqada iyo barashada waxyaabo kugu cusub
- Waa inaad tahay qof, kuna wanaagsan wada shaqaynta
- Waa inaad u hogaansami karto hogaanka shaqada

## Shuruudaha la iska rabo

- Waa inaad tahay qof degan, imaan karana waqtiga shaqada si joogta ah maalin walba
- Waa inaad ka shaqayn karto meel banaan ah
- Waa inaad tahay qof xoogan oo dhisan
- Waa inaad u hogaansimi karto qawaaniinta shaqada, sida shaqaalaha kale.
- Waa inaad dalban karto sharaxaad, hadaadan fahmin shaqada laguu diray
- Waa inaad noqotaa qof rabo inuu fahmo shaqada
- Way fiican tahay hadaad haysato laysanka gaariga, laakin shardi ma ahan
- Waa inaad shaqada imaan karto waqti hore aroortii

## Fursadaha waxbarasho ee aad heli karto; waxaa ka mid ah

- Najaar
- Faryaamo
- Fuundi
- Korontiiste
- Hagaajinta tubooyinka biyaha
- Isku rakibida dhismaha
- Shamiinteeye
- Dhisida tarjiinooyinka
- Farsamada korontada dhismayaasha
- Biro sameeye
- Dhigida alwaaxa dhulka dhismayaasha

# Xarummaha



## Shaqada la qabanayo

- La jooga iyo ilaalinta caruurta iyo dhalinta
- Keenida cuntada iyo bixinteeda
- Raacida ardayda markay dibad bax iyo dalxiis leeyihiin
- Hawlo kala duwan sida, sawirida, sawir rinjiyanta, cayaaraha iyo heesaha
- Hagaajinta xarumaha marka shaqada laga baxo
- La shaqaynta waalidiinta

## Goobaha shaqada

- Xarumaha kala duwan
- Xarumaha lagu hayo caruurta iyo dhalinta
- Iskuulada iyo naadiyada kala duwan

## Marka lagu geeyo warshad shaqo tijaabis

- Waxaad baran shaqada qaybta xarumaha
- Waxaad heli macrifo baddan
- Waxaad la kulmi ood baran madaxda shaqada iyo shaqaalaha goobta
- Waxaad heli khibrad
- Haddi lagu geeyo shaqo tijaabis warshaq, waxaad fursad u lahaan karta in mustaqbalka aad shaqo rasmi hesho

## Sifooyinka qofka loo baahan yahay

- Waa inaad ka hesho la joogitaanka caruurta iyo dhalinyarada
- Haddii aad ku hadli karto, akhri karto oo aad fahmi karto daanish ama Ingiriisi yar, waa faa'iido
- Waa inaad xiisaynayso shaqada, oo aad doonayso inaad barato waxyaabo kugu cusub
- Waa inaad ku wanaagsan tahay wada shaqaynta
- Waa inaad leedahay hal abuur
- Waa inaad u hogaansami karto maamulka shaqada

## Shuruudaha la iska rabo

- Waa inaad degan tahay, oo aad ku imaan karto waqtiga shaqada maalin walba
- Waa inaad u hogaansami karto qawaaniinta shaqada, sida shaqaadlha kale
- Waa inaad sharaxaad dalban karto, hadaadan fahmin shaqada laguu diray
- Waa inaad shaqda soo geli karto aroor hore
- Waa inaad furfuran tahay, oo aad firfircoon tahay
- Waa inaad aqbali karto in hilib doofaar uu ku jiro cuntada meesha shaqada laga bixinayo
- Waa inaad ku wanaagsan tahay wada shaqaynta oo aad dulqaad leedahay

## Fursadda waxbarasho ee aad heli karto; waxaa ka mid ah

- Barbaariye
- Kalkaaliye barbaariye
- Kalkaaliye guud
- Macalin

# Dukaamada tafaariiqda iibiya



## Shaqada aad qabanayso

- Khidmaynta kastanka/macaamiisha
- Nadiifinta guud
- Lacag qabashada
- Alaab dhigida dukaanka
- Furfurida iyo xidhxidhida alaabta

## Goobaha shaqada

- Dukaanada waawayn
- Dukaanada dharka
- Dukaanada alaabada cayaarta
- Dukaanada kabaha
- Dukaanada alaabta dhismaha
- Dukaanada buugagta iibiya
- Noocyada kale duwan ee dukaanada oo dhan

## Marka lagu geeyo warshad shaqo tijaabis

- Waxaad baran shaqada qaybta dukaanada
- Waxaad heli macrifo
- Waxaad la kulmi madaxda shaqada iyo shaqaalaha kale ee shaqada
- Waxaad heli khibrad
- Haddi lagu geeyo shaqo tijaabis warshaq, waxaad fursad u lahaan karta in mustaqbalka aad shaqo rasmi hesho

## Sifaadka qofka loo baahan yahay

- Waa inaad ka hesho u khidmaynta kastanka/amacaamiisha
- Waa inaad xiisaynayso soo dhawaynta dadka
- Haddii aad ku hadli karto, akhri karto oo aad fahmi karto daanish ama Ingiriisi yar, waa faa'iido
- Waa inaad xiiso u hayso shaqada iyo barashada waxyaabo kugu cusub
- Waa inaad tahay qof furfuran kuna wanaagsan wada shaqaynta
- Waa inaad u hogaansami karto maamulka shaqada

## Shuruudaha la iska rabo

- Waa inaad tahay qof degan, imaan karana waqtiga shaqada maalin walba
- Waa inaad u hogaansami karto qawaaniinta shaqada, sida shaqaalaha kale
- Waa inaad dalban karto sharaxaad, hadaadan fahmin shaqada laguu diray
- Waa inaad noqotaa qof rabo inuu fahmo shaqada
- Waa inaad awoodo shaqaynta waqtiyo kala duwan

## Fursadaha waxbarasho ee aad heli karto, waxaa ka mid ah

- Kalkaaliye dukaan iibiye
- Kalkaaliye alaab soo iibiye
- Kalkaaliye ganacsi

# Kaydinta & Loojistikada



## Shaqooyinka la qabanayo

- Alaab dajin
- Ka shaqaynta bakhaaraada iyo dukaanada
- Dirida alaabada
- Alaab gayn
- Baakadaynta alaabta iyo wax soo saarka goobta
- Kontoroolka alaabta iyo tirinteeda

## Goobaha shaqada

- Terminaalada/goobaha alaabtu iskugu timaado
- Bakhaarad waawayn iyo warshadaha
- Dukaanada waawayn
- Shirkadaha alaabta jumlada iibiya

## Marka lagu geeyo warshad shaqo tijaabis

- Waxaad baran shaqada qaybta kaydinta & loojistikada
- Waxaad heli macrifo
- Waxaad la kulmi ood baran madaxda shaqada iyo shaqaalaha goobta
- Waxaad heli khibrad
- Haddi lagu geeyo shaqo tijaabis warshaq, waxaad fursad u lahaan karta in mustaqbalka aad shaqo rasmi hesho

## Sifaadka qofka loo baahan yahay

- Waa inaad xoogan tahay oo aad dhisan tahay
- Waa inaad leedahay dareen wanaagsan
- Haddii aad ku hadli karto, akhri karto oo aad fahmi karto daanish ama Ingiriisi yar, waa faa'iido
- Waa inaad xiisaynayso shaqo, oo aad rabto inaad barato waxyaabo kugu cusub
- Waa inaad u hogaansami karto hogaanka shaqada

## Shuruudaha la iska rabo

- Waa inaad tahay qof degan, waqtiga shaqadana ilaaliya
- Waa inaad u hogaansantaa qawaaniinta shaqada, sida shaqaalaha kale
- Waa inaad dalban kartaa sharaxaad, hadaad fahmi waydo shaqada laguu diray
- Waa inaad tahay qof furfuran oo firfircoon
- Waa inaad aroor hore soo geli karto shaqada
- Waa inaad awood u leedahay ku shaqaynta istaag iyo socod maalintii inteeda badan

## Fursadaha waxbarsho ee aad heli karto; waxaa ka mid ah

- Kalkaaliye bakhaar haye
- Alaab kaydinta bakhaarada
- Wadida makiinada wax lagu qaado
- Baakhaaraynta iyo ka shaqayntooda

# Baakadaynta & warshadaynta alaabta



## Shaqada la qabanayo

- Isku aruurinta iyo rakibaada alaabada warshadaha
- Kontoroolka tayada alaabta
- Baakadaynta alaabta la dirayo
- Kala soocida alaabta iyo tirinteeda
- Maaraynta alaabta warshadaha
- La shaqaynta shaqaalha kale
- Nadaafada guud

## Goobaha shaqada

- Warshadaha waawayn iyo kuwa yaryar
- Shirkadaha jumladda
- Shirkadaha iyo warshadaha

## Marka lagu geeyo warshad shaqo tijaabis

- Waxaad baran shaqada qaybta warshadaha
- Waxaad heli macrifo baddan
- Waxaad la kulmi ood baran madaxda shaqada iyo shaqaalaha goobta
- Waxaad heli khibrad
- Haddi lagu geeyo shaqo tijaabis warshaq, waxaad fursad u lahaan karta in mustaqbalka aad shaqo rasmi hesho

## Sifaadka qofka loo baahan yahay

- Waa inaad xoogan tahay oo aad dhisan tahay
- Waa inaad leedahay dareen wanaagsan
- Haddii aad ku hadli karto, akhri karto oo aad fahmi karto daanish ama Ingiriisi yar, waa faa'iido
- Waa inaad xiisaynayso shaqo, oo aad rabto inaad barato waxyaabo kugu cusub
- Waa inaad u hogaansami karto hogaanka shaqada

## Shuruudaha la iska rabo

- Waa inaad tahay qof degan, waqtiga shaqadana ilaaliya
- Waa inaad u hogaansantaa qawaaniinta shaqada, sida shaqaalaha kale
- Waa inaad dalban kartaa sharaxaad, hadaadan fahmi waydo shaqada laguu diray
- Waa inaad tahay qof furfuran oo firfircoon
- Waa inaad xoogan tahay oo jirkaagu dhisan yahay
- Waa inaad aroor hore soo geli karto shaqada

## Fursadaha waxbarsho ee aad heli karto; waxaa ka mid ah

- Obaraytar warshadeed
- Shaqaalaha wax soo saarka warshada
- Shaqaale khaas ah
- Koorsooyin kala duwan

# Shaqada nadaafada



## Shaqaqda la qabanayo

- Dhiqitaanka dhulka
- Huufaraynta iyo xaaqida guud
- Tirtirada iyo bus ka qadida alaabta
- Nadiifinta musqulaha & meelaha qubayska
- Dhaqida iyo nadiifinta jaranjarooyinka
- Nadaafada guud
- Qaadista qashinka iyo soo daadintiisa
- Samaynta kafayga iyo shaaaha
- Diyaarinta cuntada iyo nadiifanteeda ka dib marka la cuno

## Goobaha shaqada

- Iskuulada
- Warshadaha
- Xafdiisyada
- Guryaha gaarka loo leeyahay
- Xarumaha dawlada iyo kamuunayaasha

## Marka lagu geeyo warshad shaqo tijaabiso

- Waxaad baran shaqada qaybta nadaafada
- Waxaad heli macrifo baddan
- Waxaad la kulmi ood baran madaxda shaqada iyo shaqaalaha goobta
- Waxaad heli khibrad
- Haddi lagu geeyo shaqo tijaabis warshaq, waxaad fursad u lahaan karta in mustaqbalka aad shaqo rasmi hesho

## Sifooyinka qofka loo baahan yahay

- Waa inaad ka hesho isku hagaajinta iyo nadiifinta
- Waa inaad u jajaban tahay shaqada
- Waa inaad si wanaagsan aad wax iskugu habayn karto, dareemina karto waxa loo baahan yahay
- Haddii aad ku hadli karto, akhri karto oo aad fahmi karto daanish ama Ingiriisi yar, waa faa'iido
- Waa inaad xiisaynayso shaqada iyo barashada waxyaabo kugu cusub
- Waa inaad u hogaansami karto maamulka shaqada


## Shuruudaha la iska doonayo

- Waa inaad degan tahay oo aad ilaalin karto waqtiga shaqada
- Waa inaad u hogaansami karto qawaaniinta shaqada, sida shaqaalaha kale
- Waa inaad dalban karto sharaxaad, hadaadan fahmin shaqada laguu diray
- Waa inaad furfuran tahay, oo aad firfircoon tahay
- Waa inaad xoogan tahay
- Waa inaad shaqada soo geli karto aroor hore

## Fursadaha waxbarasho ee aad heli karto; waxa ka mid ah

- Kalkaaliye addeege
- Kalkaaliye nadiifiye
- Koorsooyinka naddaafada faydhawrka
- Koorsooyin kala duwan oo kale (AMU kurser)

# Waaxda daryeelka



## Shaqada aad qabanayso

- La joogitaan iyo daryeelka waayeelka
- Soo adeegid iyo cunto siin
- Banaan gayn, dukaamaysi iyo dalxiis gayn
- Xanaanayn guud
- Nadiifin guud
- La shaqaynta qaraabada dadka waawayn

## Goobaha shaqada

- Aqallada la ilaaliyo
- Aqallada xanaanaynta dadka waayeelka ah
- Xarumaha waayeelka loogu tala galay
- Guryaha gaarka loo leeyahay

## Marka lagu geeyo warshad shaqo tijaabis

- Waxaad baran shaqada qaybta daryeelka waayeelka
- Waxaad heli macrifo baddan
- Waxaad la kulmi madaxda shaqada iyo shaqaalaha waaxda
- Waxaad heli khibrad
- Haddi lagu geeyo shaqo tijaabis warshaq, waxaad fursad u lahaan karta in mustaqbalka aad shaqo rasmi hesho

## Sifooyinka qofka loo baahan yahay

- Waa inaad xiisaynayso xanaanaynta iyo daryeelka waayelka
- Waa inaad xiisaynayso la joogitaanta waayelka iyo naafada
- Haddii aad ku hadli karto, akhri karto oo aad fahmi karto daanish ama Ingiriisi yar, waa faa'iido
- Waa inaad rabto shaqo iyo barashada waxyaabo kugu cusub
- Waa inaad ku wanaagsan tahay wada shaqaynta
- Waa inaad u hogaansami karto hogaanka shaqada

## Shuruudaha la iska rabo

- Waa inaad tahay qof degan, shaqada waqtigeedana ilaalin kara
- Waa inaad u hogaansanto qawaaniinta shaqada, sida shaqaalaha kale
- Waa inaad dalban karto sharaxaad, hadaadan fahmin shaqada laguu diray
- Waa inaad aroor hore soo shaqo geli karto
- Wa inaad tahay qof furfurn
- Waa inaad aqbali karto in hilib doofaar uu ka mid yahay, cuntada laga bixiyo meesha shaqada.
- Waa inaad ku wanaagsan tahay wada shaqaynta, oo aad dulqaad leedahay

## Fursadaha waxbarasho ee aad heli karto waxaa ka mid ah

- Bulshada iyo caafimaadka daryeelka waayeelka
- Kalkaaliye caafimaadka daryeelka waayeelka
- Kalkaaliye caafimaad

# Beeraha/Beera falashada/ Duurka



## Shaqooyinka

- Daryeelida xayawaanada guryaha
- Beera goosashada iyo goobta shaqada
- Dayactirka aagaga cagaarka
- Abuurida iyo tollida
- Jarida, dhisida iyo dayactirka duurka iyo aagaga dabiiciga ah
- Qaababka dhismaha, dhagaxaanta fadhiya iyo dhagaxaanta simman
- Dayactirka iyo dhismaha beeraha iyo darjiimada
- Xakameynta cowska iyo cayayaanka
- Beerista iyo qaadista weelka dhirta, qudaarta, duurka iyo geedaha
- Adeega macmiilka

## Goobta

- Meesha xanaanada dhirta
- Xarumaha beerta iyo guriga dhirta
- Beeraha
- Maamulida duurka iyo dhinaca baadiyaha
- Qabuuraha, darjiimada iyo beeraha gaarka ah
- Machadyada
- Bulshada guriga

## Marka lagu geeyo warshad shaqo tijaabis

- Waxaad baraneysaa warshadaha
- Waxaad hormarineysaa shabakada warshadaha
- Waxaad baraneysaa badrooniga oo heleysaa saaxibo cusub
- Waxaad heleysaa waaya aragnimada
- Haddi lagu geeyo shaqo tijaabis warshaq, waxaad fursad u lahaan karta in mustaqbalka aad shaqo rasmi hesho

## Tayada shaqsiga

- Waa inaad rabootaa inaad ku shaqeysid dabiiciga, deegaanka, dhirta iyo xaywaanaka
- Haddii aad ku hadli karto, akhri karto oo aad fahmi karto daanish ama Ingiriisi yar, waa faa'iido
- Waa inaad rabootaa inaad shaqeysid oo baratid waxyaabo cusub
- Ku wanaagsan iskaashiga
- Madax banaanida iyo dadaalo badan
- Waa inay kuu suurtogashaa inaad ku shaqeysid sida waafaqsan maamulka

## Sharuudaha

- Waa inaad xasiloonaataa oo waqtigaada imaataa maalin walba
- Waa inaad jeclaataa banaan ka shaqeynta
- Waa inaad jir ahaan xooganaataa
- Waa inaad raacdaa isla sharciyada sida saaxibadaada
- Weydii haddii aadan fahmin shaqooyinka
- Cajiib noqo
- Waa faa'ido haddii aad leedahay shatiga gaari kaxeynta, laakin looma baahno
- Imow xili hore shaqada ee subixii

## Suurtogalnimada waxbarashada, tusaalooyinka

- Beeraleyga, xayawaanada guryahah
- Beeraleyga, dhirta
- Caawiyaha beeraleyga, dhirta ama xayawaanada
- Maamulaha farasta
- Shaqaalaha mashiinka beeraha
- Hayaha
- Beeraha qaabka dhulka
- Beeraha
- Ubax diyaariyaha
- Farsamada duurka iyo dabiiciga
- Dhisaha bulkeetiga
- Beeraha qaabka dhulka

# Qoraalkaaga gaarka ah

Xuquuqda daabacaadda ee daabacaadda buug-yarahan ku saabsan baakadaha warshadaha

© KOMPETENCECENTER SKANDERBORG

Guddiga Farsamada iyo Shaqaaleynta ayaa daabacday buug-yarahan oo ku saabsan baakadaha warshadaha, 2018.

Styrelsen for Arbejdsmarked
og Rekruttering
Vermundsgade 38
2100 København Ø

T. 7221 7440
E-mail. star@star.dk
www.star.dk